# TAARIIKH-NOLOLEEDKII 13-KII WIIL OO AS-AASAY XISBIGII SYL.








**W/Q :Aw -Jaamac Cumar Ciise**

**Daabacaddii Koowaad, 1965kii**

# MAHADNAQ

Naadiga hal abuurka iyo qalinmaalka soomaaliyeed ee Bariga iyo Bartamaha Soomaaliya waxay u mahad Celinayaan C/llaahi Sheekh Aadan oo Turjumay Buuggaan Yar oo Carabiga ahaa oo uu Qoray Qoraa Sare Awjaamac Cumar Ciise lana Qoray Sanadka Markuu ahaa 1965^tii kana Qoray Dhalinyaradii SYL noloshoodii iyo Aqoontoodii si Jiilka Da'da yar ay u gartaan Halgankii Dhalinyaradii SYL.

Sidoo kale waxay u mahad celinayaan Cabdullaahi Maxamed Xasan (Black) oo tifaftiray Buugaan yar oo ka hadlayo Halgankii Dhalinyaradii SYL.

Dhammaan waxay u mahad celinayaan Dadkii Maal-geliyey, Kooxdii Daabacday iyo Dhammaan Jiilka akhrisan doono Buugaan yar oo uu Qoray Qoraa sare Aw-jaamac Cumar Ciise.

# TAARIIKH-NOLOLEEDKII 13-KII WIIL OO AS-AASAY XISBIGII SYL.

W/Q :Aw -Jaamac Cumar Ciise
Daabacaddii Koowaad, 1965kii

## Hordhac

Waxaan ku bilaabayaa Magaca Eebe leh Naxariis Guud iyo Mid Gaar ahaaneed.

Nabad galyo iyo naxariis Nibigeena Maxame kor kiisa ahaato, Ehalkiisa, Asxaabtiisa iyo intii raacday.

Intaa kaddib.

Maalin anigoo bixinaya cashar taariikh ah arday ka mid ah Ciidamada Amniga ee Iskuul ka Xamar Jajab Muqdisho baa waxaa su'aal iwaydiiyay arday, Maxaa loo qori waayay taariikhda Soomaaliya ilaa maanta? Hadii la dayacay xilgii gumaysiga waa arrin la fahmi karo, laakin maxaa loo qori waayay hadda, gaar ahaan ragii aas aasay xisbigii midnimada dhalinyarada Soomaaliyeed, taas oo aan maanta guranayno mirihii ka dhashay halgankoodii dhamaan inta hoos joogta Samada Jamhuuriyada Soomaaliya.

Arrintaas waxay raad ku reebtay naftayda, waxayna igu riixday in aan baaritaan iyo daraaso sameeyo. Waxaana go'aansaday in aan wax ka qoro mowduucaan, waana kan aniga oo idin soo gudbinaya maanta buugan oo aan kugu talagay kulamid ka ah wiilkan qiiraysan iyo dhamaan Dhallinyarada ummada Soomaaliyeed, iyo dhamaan kuwa kasta oo u halgamaya xornimo, garanaya qiimaha ay leeyihiin dadkii xorta ahaa ee jihaadayay, waxaana laga yaabaa in uu yahay buugiii koowaad oo noociisa ah oo laga qoray mawduucan.

Waxaan Allah waydiisanayaa raali ahaansho iyo waafajin, waxaana umadaana uga baryayaa sharaf weyn iyo guul taam ah.

Jaamac Cumar Ciise Soomaali

July 1965

الرحيمالرحمناللهبسم

## Sidee buu ku aasaasmay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed?

Maalintii Shan iyo tobnaad bishii May1943, waxaa u dilaacay waa cusub Waddankeena sharafta leh, kaddib markii waddanka looga dhawaaqay dhalashadii u horaysay ee Xisbi waddani ah, kaas oo ahaa Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed.

Waxaa laga yaabaa dad badan oo ka mid ah akhristayaasha in ay u xiisoodaan sheekada ku saabsan sida uu ku bilowday iyo markii Koowaad ee ay kulmeen xubnihii aasaasay, tillaabooyinkii u horreeyay ee ay qaadeen inta uusan dhalan iyo sida uu intaas kaddib uu bannaanka ku yimid.

Marka aan bilowno sheekda bilowgeeddiii.

Aan xoogaa dib ugu noqono wax yar wixii laga yiri 15-kii May 1943, bilo ka hor maalintaas, waxaa galab kulmay Cabdiqaadir Sakhawaddiin iyo Yaasin Xaaji Cismaan Sharmarke, waxay ahaayeen labo saaxiibo ah oo aad isugu weyn, quluubtoodana ay ka buuxdo jacaylka waddankooda qaaliga ah, way kulmeen waxayna ka sheekaysteen maamulka isticmaarka ee ingiriiska, iyada oo mid kasta uu xambaarsanaa fikrad uu u arkayay in ay u wanaagsan tahay waddanka, halka Cabdiqaadir wuxuu arkayay in la aasaaso urur islaami ah oo xaqiijiya waxyaabaha muslimiintu u baahan yihiin, Yaasin na wuxuu arkayay in la aasaaso Xisbi

siyaasi ah oo matala shacabka Soomaaliyeed dalbayana midnimada waddanka.

Midba midka kale ayuu la wadaagay wixii laabtiisa ku jiray, way sii socotay sheekadii iyaga oo ka wada hadlay mawduucaan ilaa ay gaareen habeen barkii, waxayna caadaysteen in ay xeebta aadaan galab kasta iyaga iyo koox kale waxayna ka sheekaysan jireen arrimaha waddanka iyo waxyaabaha uu keenay gumaysiga.

Galab ka mid ah galbaha ayay aadeen Xeebta waxayna dhexdooda ku heshiiyeen in ay aasaasaan gole ay leeyihiin dhallinyarada Soomaaliyeed ay ku kulmaan dhexdiisa kuna sheekaystaan, iskuna bartaan, waxna ku bartaan, is ay gogal xaar ugu noqoto in laga adkaado gumaysiga, loona badelo xisbi siyaasi ah marka uu gaaro xaalad ku haboon oo suuragalinaysa in uu guto ujeeddooyinkiisa siyaasadeed, sidoo kale waxay ku heshiiyeen in ay fikradan ahaato mid sir ah oo aan dhaafin dhexdooda, wada xiriirkuna ahaado mid joogta ah.

Habeen ayaa waxaa ku kulmay koox dhallinyaro intooda badana ay yihiin aasaasayaashii, guri tacsi ka jirtay oo ah geeridii aabihii dhalay Maxamed Cabdullahi (Xayaysi) waxaana goobtii ka hadlay Cabdulqadir Sakhawaddiin, wuxuuna sheegay in dadku yihiin carruurtii Aadam iyo Xaawo, Ilaahayna uusan u kala soocin dadka caddaan iyo

madaw ayna siman yihiin Ilaahay hortiisa, diimaha Samaawiga ahna waxay boorinyaan arrintaas, wayna inkirayaan gumaysiga, takooridda midka ku salaysan. Wuxuuna ahaa hadalkiisu mid taabtay quluubta dadkii joogay meeshaas, nin walbana wuxuu ogaaday waajibka ka saaran ummaddiisa.

Maalintii xigtay waxaa la qabtay kulan sir ah oo ay ka qayb galeen qaar ka mid ah
aas-aasayaasha, fikradda ugu weyn oo laga hadlayayna waxay ahayd suurtagalnimada in la aas-aaso gole aan siyaasi ahayn, kaas oo ay ku kulmaan dhallinyaradu si ay isugu bartaa, Luqadda Ingiriiskana ku bartaan taas oo ahayd luuqad ku cusbayd waddanka, way sii socotay dooddii ilaa xilli dhexe oo habeen kii ah , wixii ka soo baxayna waxay noqotay in qof kasta oo ka mid ah dadkii soo xaadiray ay keenaan qof uu ku kalsoon yahay, waxaana loo dib dhigay kulankii xigay maalinta Axada ee soo socota.

Markii la gaaray maalintii la ballamay waxaa yimid tiradii loo baahnaa, kaddibna si rasmi ah baa shirkii loo furay waxaana loo sharaxay dadkii ujeeddada shirkan, waxaana la diyaariyay waxyaabihii muhiimka u ahaa kulanka, dood dheer oo saacada qaadatay kaddib waxaa la gaaray sadex qodob oo aas-aas muhiim ah, waxayna soo jeediyeen in ay ahaato sir.

1. In loo gudbiyo codsi Dowladda gumaysiga ee waddanka haysata (Ingiriis) in ay ogalaato in la furo

gole magaciisu yahay: Golaha Dhallinyarada Soomaaliyeed.

2. In la kireeyo guri ku habboon hawlaha muhiimka ah, laguna soo dumo quluubta Dhallinyarada.
3. In la dejiyo barnaamij ku meel gaar ah, kana kooban shaqooyinka muhiimka ah ee Golaha.

Maalintii xigtay xubnuhu waxay qoreen codsi ay u gudbiyeen dowladdii Ingiriiska, waxayna isu dardaarmeen in aan qofna shaqo tegin maalinta arbacada ah ee soo socota si ay dhammaan u aadaan xafiiska ninkan qaybtaan xukuma.

Waxaa la qaatay tillaabooyinkii loo baahnaa, kaddib markii la gaaray maalintii la ballamay, ayaa sadex iyo tobankii xubnood aadeen ninkii Ingiriiska ahaa ee xukumay qaybta Ingiriiska, si ay ugu gudbiyaan codsigii, xubnaha qaar ayaa rajaynayay in ay fikradan guul ku dhamaato halka qaarna ay filayeen in aysan guul ku dhamaan, waxay la kulmeen ninkii Ingiriiska ahaa waxayna u gudbiyeen codsigii ay wadeen, wuxuuna ku yiri "Waxaad tihiin qabaa'il kala duwan waxaana adag in aad fikir isku waafaqdaan, waxaana idiin arkaa in aad tihiin Dhurwaa iyo Ari beer ku jira, see bay u suurobaysaa in aad gole ku kulantaan idinka oo is khilaafayn waa waxaan la filayn", waxay ku dhaheen "Waxan u qaadanaynaa hadalkaaga cashar, Dhurwaayada waan rabaayadaynaynaa waxaana ka dhigaynaa in ay Ariga isla noolaadan iyaga oo aan is cunayn, wax fogna ma ahan in

aad aragtid maalin anagoo gole ku midaysan, khilaafna uusan naga dhaxayn, arrintaas khilaafka ahna waa wixii uu gumaysigii Talyaanigu abuuray." Wuxuu yiri "Waa waxaan dhacayn in aad wax isku waafaqdaan waana wax aad u dheer in ay sax noqdaan waxaad sheegaysaan, laakiin waxaan idin kaga digayaa in aad siyaasad faraha la gashaan jawaabtana waxaad heli doontaan asbuuca dhamaadkiisa".

Waxaa soo maray maalmo ay laabtoodu cariir gashay, waxaa ku dheeraaday maalmahii loo qabtay, waxayna galab kasta aadaan xeebta iyaga oo ka fakaraya arrimaha iyo xaladaha mustaqbalka.

Maalin Isniin ah ayay xubnuhu warqad gaduudan ka heleen ninkii Ingiriiska qaybta u xukumay, waxaana ku qornaa, dowladda Ingiriiska ee milateriga ah weli waxay ku jirtaa dagaal qofna uma ogalaaanayso in uu faraha la galo arrimaha siyaaasadda ilaa ay ka baxdo dagaalka socda, sidaas oo ay tahay waxay ogalaatay in aad furataan Gole aad ku kulantaan kuna qabsataan danihiina.

Maalmo yar kaddib 15 May, waxaa lagu dhawaaqay Golihii la magabaxay (Golaha Dhallinyarada Soomaaliyeed) wuxuuna noqday wax jira isaga oo leh ujeeddooyin cadcad oo ah:

1. In la tuuro qabyaaladda, kala soocidda diinta ama dariiqada iyo la dagaalanka kala gaynta dadka hab qabiil.
2. In aan la ogalaan in uu ka mid noqdo golahaa nin da'diisu ka wayn tahay 45 sanno si uusan ugu dhex darrin fikradaha gumaysiga ama ka yar 15 sanno kaasna xilligii carruurnimada ayuu ku jiraa.
3. In aan loo ogalaanin in uu soo galo golaha qof aan xubin ka ahayn
4. Dhammaan xubnaha ka qayb galaya waa walaalo wayna iskaalmaysanayaan.[i]

Way socdeen waxayana horay u qaadeen tillaabooyin aan wax loo dhigo jirin, waxaa ka qayb qaatay in badan oo Dhallinyarada ka mid ah, hoggaamiyaashii xubnahana way dadaaleen sidii ay howshooda u hagaajin lahaayeen, iyada oo ay haysato cadaadis daran, caburin, aamusin iyo in aysan muujisan karrin howshooda.

Sidii looga bartay gumaysiga wuxuu baaritaan ku samayn jiray dhammaan waraaqaha ay qoraan iyo kuwa loo soo diro, maalin maalmaha ka mid ah bay heleen warqad ku socota golaha kuna qoran af aysan fahmayn waxay ku sameeyeen baaritaan dheer, kaddib ninka mid ah kormeerayaasha ayaa waydiiyay xubnaha golaha in ay ogyihiin warqaddan, way garteen wayna fasireen waxayna usheegeen in ay ayaga u socotay waxayna ku qornayd Af

Soomaali oo ahaa kii la isticmaali jiray xilligii Cusmaaniyiinta, waxaa shakiyay dowladdii Ingiriiska, waxayna tiri kuwaan waxay wadaan wax kale, waxayna bilaabeen in ay dabagal ku samayeen dhallinyarada habeen iyo maalin, waxaana bilowday wararka suuqa oo soo gaaraya golaha in boolisku raadinayo xubnaha golaha Dhallinyarada lana qaban doono.

Madaxdu waxay ahaayeen kuwo u shaqeeyay siday u fulin lahaayeen mabaad'iida ay aaminsan yihiin, una qaadi lahaayeen tillaabooyinka laga mamaarmaaanka ah. Waxaa tagay sannado yar arrintiina weli ma istaagin, golihiina wuxuu isu bedelay xisbi siyaasi ah, muuqaalkiisuna yahay mid ummadeed, xoojinaya mabaad'idiisa, ballaarrinaya shaqooyinkiisa, xarumihiisa, xiriirka uu laleeyay bulshawaynta, wuxuu ka dhisay laamihiisa dhamman qaybaha waddanka oo dhan, waxaana ku biiray rag aqoonyahanno ah iyo shaqaalihii dowladda, sidoo kale waxaa ku biiray ciidamada iyo Booliskii, iyagoo ujeeddadoodu tahay difaacidda iyo ilaalinta xaqa muwaadiniintaa, danaha waddanka iyo ka hortagidda gumaysiga iyada oo la adeegsanayo dareen waddaniyadeed lana raadinayo xornimo.

Goluhu wuxuu matalayay dhaqdhaqaaqii waddaniga isaga oo kor u qaaday hammigii ka toosiyayna shacabka hurdadii

iyo fadhigii uu gumaysigu keenay. Mahaddeeda waxaa leh dhalashadii dhaqdhaqaaqii waddaniga ahaa, taas oo ay mahadeeda leeyihiin raggii ka midka ahaa xubnihii aasaasay ee 13-ka ahaa, kuwaas oo ay sharaf ii tahay in aan qoro taariikh nololeedkoodii oo kooban, iyada oo ay tahay waajib waddani ah in la barto sharaftii ay laheeyeen iyaga oo galay taariikhda.

---

Wuxuu ii sheegay Macallin (Maxamed Wajiih Sulaymaan) oo ka mid ahaa Macallimiin loo soo diray Soomaaliya oo Carab ahaa, Mudane Maxamed Cusman oo ka mid ahaa xubnihii 13-ka ahaa wuxuu igu yiri, Goluhu wuxu u dhisnaa sidan:

Shiikh Cabdiqadir Sakhaawaddiin Guddoomiye, Mudane Xaaji Maxamed Xuseen iyo Mudane Xirsi Nuur Guddoomiye ku xigeeno, Mudane Yaasiin Xaaji Cusmaan Xoghaye, Mudane Daahir Xaaji Cusmaan Xoghaya Maaliyadda,Shiikh Maxamed Cusmaan Maxamed (Baariyow) iyo Mudane Dheere Xaaji Dheere kormeerayaasha Maaliyadda.

## Xubinta 1aad

## Mudane Cabdiqaadir Sakhaawaddiin.



Wuxuu ku dhashay Tuullada Tiyeeglow taas oo ku taal dhinaca Biyooleey ee Gobolka Jubbada Sare Sanadkii 1919kii, wuxuu ku dhex barbaaray qoys diin leh, kuna dhex barbaaray culimada qaybta suufiyadda, isagoo ka qaatay culimadaas aasaaska diinta islaamka, wuxuu qur'aanka xifdiyay asagoo yar, wuxuuna bartay luqadda carabiga isaga oo sugay qaybaheeda kala duwan,wuuna barashadaas waday illaa uu ka gaaray qaangaar. Iyadoo barbaarrintii diiniga ahayd ee qoyskooda iyo tarabiyadii ruuxiga ahayd ee wadaaddada suufiyada iyo daalacashadii iyo akhrintii Kutubta diiniga ah waxaas oo dhan yaa raad ku yeeshay dabeecaddiisa shakhsiyaadeed.

Mudane Cabdiqadir Sakhawaddiin, waxay xoojisay ama awoodsiisay dareenkiisa diineed gaar ahaan ku

biiritaankisii dariiqada Qaadiriyada. Waxay gaartay dareenkiisa xaga diinta in uu gaaray in uu rumaysnaaado in lagalo hadlay isaga oo hurda ama soo jeeda arrimaha qaar ee qarsoon, asaga oo naftiisa usheegay in uu yahay Shiikha islaamka, waddankuna uu gacantiisa kaga badbaadi doono isticmaarka.

Markii ay ku xoogaysatay arrintan wuxuu bilaabay in uu aasaaso xafiis ay isugu yimaadaan dadku kuna baro Diinta Islamka iyo mabaad'ideeda.Wuxuu kaloo ku fekeri jiray in mar uun aasaaso hay'ad samafal ah, arrintaas oo ku qaadatay waqti aad u dheer. Wuxuu ahaa mid aanan marnaba ka daalin in uu dadka wax baro, isla markaana shaqeeya, leh firfircooni dheeraad ah, xariifna ku ah howlihiisa, wuxuu ahaa nin qof naxariis badan oo waxyaabaha bulshada ka dhex jira inuu xalaiyo mar kasta u taagan ilaa tii Rabi utimid.

Waxay kulmeen saaxiibkiis aadka ay isku jeclaayaan ee Yaasiin Xaaji Cisman, wuxuuna kulankoodu ahaafurihii khayrka oo dhan iyo waacusub oo beryay ummadda

Soomaaliyeed. Mudane Yaasin wuxuu ahaa nin leh darajo aad uwayn oo ah xagga ogaansha iyo aqoontaba, markiiba waa uu dumay markuu arkay in Mudane Cabdiqadir Sakhawaddiin isagoo la yaabay awoodaha xaga diiniga ah ee uu leeyahay toos oo Yaasin uu awooday in uu u wareejiyo Mudane Sakawaddiin dhinaca Waddaniyada isagoo arkay in ay tahay meel ku habboon, taaas oo uu u soo bandhigay saaxiibkiis in aasaasidda Gole ay ku kulmaan Dhallinyarada Soomaaliyeed ee xorta ah si ay ugu wadaagaan aragtidooda ku wajahan waddanka iyo midnimada dhulkooda, waxaana lagu aasaasay Golahaas dadaalkii ay bixiyeen labadan saaxiib iyo saaxiibadii kale ee soo raacay.

Mudane Cabdiqadir Sakhaawaddiin wuxuu lahaa awood diini ah iyo mid shakhsiyadeed oo soo jiidasho leh iyo dabeecad wanaagsan taas oo ka dhigtay in uu noqdo xubintii ugu horraysay ee xubnihii aasaasay Golihii kulanka Dhallinyarada Soomaaliyeed ee 13ka ahaa. Wuxuuna ahaa hoggaamiyahooda koowaad, wuxuuna noqday hoggamiyihii ugu horreeyay ee Xisbiga Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed.

Wuxuu gaaray xagga waddaniyada heer aan lagu sifayn karrin qalin wuxuuna ahaa tusaale lagu daydo iyo xubin

wanaagsan oo bulshada ka mid ah. Wuxuu muujiyay himaddiisa sarraysa iyo afcaashiisa waawayn iyo diyaargarowgiisa wanaagsan wax lagu xasuusto wanaag intii la doono.

Wuxuu ukala gooshi jiray magaalo ilaa magaalo, asagoo u khudbayn jiray dadka Soomaaliyeed, kana wacyigelin jiray, waxyaabaha dhibka ah ee jira, wuxuu isku dumi jiray quluubtooda kuna beeri jiray waddan jacayl, taas oo uu awooday caadhifadiisii diiniga ahayd in huriyo dareenkooda iyo xamaasaddooda, wuxuuns u ifiyay waddadii halganka kama uusan daalin in uu dadka ugu yeero in dalkalaga xoreeyo gumaysiga iyo in lagu dadaalo hormarrinta muwaadiniiinta.

Mudane Saqaawaddiin Allaha u naxariistee, waxaa lagu imtixaanay xanuun xubnaha ah kaas oo ay dhakhaatiirtu ka quusteen, waxaana la yiraahdaa halgankii uu la galay isticmaarka iyo ciriirigii uu noloshoodii geliyay darteed ayaa loo sumeeyay, taas oo soo
dedejisay geeridiisa wuxuu dhintay August 1945 asagoo dhalin yaro ah jirana 26 sano. Geeriduus waxay ahayd mid ay aad uga murogoodeen muwaadintu gaar ahaan dadkii yaqaanay wanaagiisa kuwaas oo aan hilmaami doonin nolashooda.

**Xubinta 2aad:**

**Mudane Maxamed Xirsi Nuur.**



Mudane Maxamed Xirsi Nuur wuxuu ku dhashay Tuullada Mareeg oo ka tirsan Degmada Ceeldheer 1915.Wuxuu ku barbaaray guriga waalidkiis isagoo helay barbaarrin wanaagsan.Kaddib Reerkooda waxay u wareegeen magaallada Muqdisho labo sano kaddib dhalashadiisii.

Quraanka Kariimka ah wuxuu ku bartay magaallada Muqdisho gaar ahaan degmada Wardhiigley, wuxuu macallinba macallin ku wareejiyo, wuxuua xifdiyay inta badan Qur'aanka, kaddibna wuxuu u wareegay masjidka si uu barto culuunta diiniga ah iyo luqadda carabiga.

1930kii wuxuu ku biiray iskuul Talyaanigu lahaa. Subaxii wuxuu maamuli jiray Maqaaxi uu lahaa, galabkiina wuxuu aadi jray iskuulka, oo uu ka baartay luqadda Talyaanig.saddex sano oo uu iskuulka dhiganayay kaddib wuxuu u leexday dhinaca ganacsiga, kaas oo uu aad jeclaa. Waxaa batay safaradiisii ganacsiga ee ku tagi jiray Magaallada Cadan sidoo kale wuxuu ahaa wakiilka qaar ka mid ah Ganacsatadii Muqdisho. Muddo kaddib wuxuu u

wareegay magaallada Addis Ababa, oo uu ganacsigiisiika sii watay, wuxuuna halkaasi ku nagaaday sadex sano ah, wuxuuna ahaa waddani khaalis ah, khayr jecel saaxiibo badan leh.

1941kii, markii ay Ingiriisku qabsadeen Soomaaliya wuxuu u safray Mudane Maxamed Xirsi Nuur dalka Kenya arrimo ganacsi aawadeed, kaddib markii uu ka soo laabtay Kenya wuxuu ku nagaaday Muqdisho asagoo sii watay ganacsigii.

Wxayaabaha uu aadka u hamiyi jiraya waxaa ka mid ahaa aasaasidda Urur Samafal ah oo ay ku kulmaan Culumada, gaar ahaan ragga waawaayn, laguna oogo shacaa'irta Islaamka, ayna isku waydaarsadaan fikradahooda, wuxuu kaloo aad u jeclaa kuna taami jiray unkidda Shirkad ganacsi oo wayn, wuxuuna markii dambe Illaahay u qaddaray in uu nasiib u yeesho in uu ka qayb qaato shaqadii wanaagsanayd ee dadkiisa lagu xorreeyay.

Wuxuu ahaa Mudane Maxamed Xirsi Nuur xubintii labaad ee xubnihii 13ka ahaa kuwaas oo aasaasay Xisbigii midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed.Wuxuu ahaa nin

shaqadiisa ka adag, firfircoon, naftiihure ah oo maslaxaddiisa gaarka ah ka jecelaawaddankiisa, daacadna u ah dadkiisa, una qiiraysan Diintiisa iyo dalkiisa, marka uu qiiroodo, wuxuu ahaamid aan awoodin in uu xakameeyo naftiisa.

1954kii waxaa loo magacaabay Xafiiska tirakoobka jinsiyadaha,balse waqti yar kaddib wuu iska casilay, sababo la xariira in la tuhmay, kaddib wuxuu u wareegay Bangi lagu magacaabi jiray Tasliif, isna kuma uusan nagaan oo sannad markii uu ka shaqaynayay ayaa xilkii laga qaaday kaddib markii lagu tuhumay arrimo siyaasadeed.

Wixii xilligaas ka dambeeyay wuxuu iska dhaafay guud ahaan shaqadii dowladda, waayo waxaa gacanta ugu jirtay isticmaarkii waddanka haystay, wuxuuna u weecday dhanka ganacsiga. Maxamed Xirsi Nuur isaga oo nool ayaan kula kulmay kulmay gurigiisa isaga oo ay ka muuqato wajigiisa farxad kuguna yeelanaya saamayn deg deg ah ILAAH ha dheereeyo cimrigiisa.

## Xubinta 3aad

## Mudane Yaasiin Xaaji Cismaan.



Wuxuu ku dhashay Mudane Yaasiin Xaaji Cismaan Baadiyaha Magaallada Hobyo ee Gobalka Mudug 1917kii. Wuxuu ku barbaaray guriga waalidkiis, isagoo da' yar ayuu ku bartay Qur'aanka kariimka ah iyo mabaad'ida culuumta islaamka isla Magaallada Hobyo, yaaraannimadiisa wuxuu ahaa inan aad u caqli badan. Aabbihiis wuxuu ahaa nin Caalim ah, Saahidna ka ah adduunyada, ku shaqeeya cilmigiisa, wuxuu xoogga saaray wax baridda wiilkiisa ilaa uu ka dhamaystay daraasaddii cilmiga ahayd ee qur'aan ka iyo qorista iyo mabaad'ida aasaaska ah ee luqadda carabiga.

Kaddib wuxuu ku biiray iskuulka hoose ee Talyaniga wuxuuna ka bartay luqadda Talyaaniga ilaa uu ka gaaray heer wanaagsan, wuxuu noqday qoraa mid ka mid ah xafiisyada xukuumadda Talyaaniga, wuxuunamagac iyo darajo ku dhex yeeshay dadkii isaga lamidka ahaa, taas oo uu ku kasbaday dadaalkiisii iyo caqligiisii wuxuuna ku sifoobay tilmaamo ay yartahay in qof kulansado.

Xilligii Ingiriisku qabsaday Soomaaliya wuxuu bartay luqadda Ingiriiska taas oo ka dhigtay nin luqado yaqaan ah, wuxuuna ku hadli jiray saddexda luqadood ee Carabiga, Ingiriiska iyo Talyaaniga, wuxuu lahaa dhaqanka wax aqrinta, wuxuu aad u aqrin jiray kutubta diiniga ah iyo majaladaha siyaasadda ah iyo wargaysyada akhbaarta, waxaa la sheegay in uu aad u jeclaa Kitaabada Shiikh Dandaawi Jowhari iyo Majalada Manaar ee Rashiid Ridaa iyo warkayska Fatxi ee uu qoray Muxibiddiin Alkhadhiib, ilaa uu ka sara maray dadkii la midka ahaa, wuxuuna ka kasbaday nolashiisii khibrad ballaaran iyo tijaabooyin taas oo aysan samayn dadkii la midka ahaa, mana uusan ku dayici jirin waqtigiisa oo wuxuu wakhtigiisa ku bixin jiray barashada cilmiga iyo ka faa iidaysigiisa iyo daalacashada culuunta naftiisu u baahan tahay, taas oo gaarsiisay inuu qoraa u noqdo Xukuumaddii gumaysiga ee Ingiriiska, ugu dambayntiina waxaa loo magacaabay Madaxii qaybinta Sonkarta.

Waxay caadadiisu ahayd in uu ka fekero mar kasta waxa dalkiisa anfacaya, korna uqaadaya sharaftiisa, ka saaraaya gacmaha gumaysiga kaas oo cunaya hilibkiisa iyo caanihiisa khaaliska ah, isagoo fiirinayay habeen iyo maalinba ballamaha beenta ah ee la qurxiyay ee uu gumaystuhu u ballnqaadayo dadka.

Wuxuu bilaabay in uu ka fekero waddadii looga takhalusi lahaa dabarrada duliga ah iyo addoonsiga, wuxuu ahaa nin neceb qabyaaladda, salaadiinta iyo shaqooyinkooda iyo cid kasta oo ku faanta. Wuxuuna dhihi jiray "waa salka ay ka soo baxdo fidnadu, waa xanuunka wax kala geeya, waana hubka uu cadowgu adeegsado"

Markii uu arkay aragtida dheer ee isticmaarku ku doonayo inuu isaga maamulashowaddanka sida uu isagu rabo, Waddankuna uu dalbayo cid gacmihiisa qabata, Shacabkuna ubaahanyahay cid ka toosisa hordada dheer.

Wuxuu tijaabiyay xaaladaha, wadciga jirana wuu darsay,xaaladda siyaasadeed ee jirtana xisabta buu ku darsaday, wuxuuna fiiriyay waddankiisa uu jecelyahay.Wuxuuna jeexay tillaabadii uu u arkay mid guulaysanaysa sawaabkana u dhaw.Wuxuu ahaa nin shakhsiyad u saaxiib ah, awood iyo soo jiidasho leh, taas oo uu dadka ku saamayn jiray.

Waqtigu wuxuu kulmiyay isga iyo saaxiibkiis Mudane Cabdiqadir Sakhaawaddiin, waxayna ku heshiiyeen fikarad

run ah taas oo uu xambaarsanaa Yaasiin iyo fulinteeda ilaa ay ka kulmiyeen koox Ilaahay rumaysay Rabbina usiyaadiyay iimaan iyo hanuun wuxuu usoo bandhigay fikaraddii ay xambaarsanayeen wayna is dhaarsadeen in ay waddanka u istaagaan wax kasta oo kala gaynayana ay ka fogaadaan, sida haybta, qabyaaladda, koox diineed sida suufiyada iyo wixii la mid ah, si ay Soomaaliya unoqoto ummad mid ah.

Wuxuu ahaa xubintii saddexaad ee xubnihii 13ka ahaa ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuu ahaa kii dhigay dhagixii koowaad, abuuray geedkii koowaad ee mirihiisa la guranayo ilaa iyo hadda, wuxuuna dariiqa u ifiyay dhallinyaradii Soomaaliyeed, isagoo ujeexay qorshayaal siyaasadeed, markii uu dhamaystirayna wuxuu ka tagay dardaaran ku aaddan dhinacyada nolasha siyaasadeed iyo tan bulshaba, mana jiro qof inkiraya in uu ahaa hoggaankii koowaad iyo aasaasihii koowaad ee Golihii dhallinyarada Soomaaliyeed, wanaageeda dhamaantiisna uu unoqonayo isaga maamul iyo wanaajinba.

## Xubinta 4aad

## Mudane: Xaaji Maxamed Xuseen.



Wuxuu ku dhashay Magaallada Muqdisho sanadii 1917kii.
Wuxuu ku barbaaray guriga labadiisa waalid, barbaarid wanaagsan ee shareecada islaamka. Wuxuu u wareegay Dugsiga hoose ee Talyaaniga , laakin Aabihiis raali kama noqon wuuna ka bixiyay isagoo ka baqaya in ay saamayn ku yeelato oo ay ka leexiyaan Diintiisa toosan qolyaha wax gaalaysiiya, wuxuuna u diray adeerkiis oo Mahaddaay degganaa, wuxuuna faray in uu baro kutubta fiqiga ah, ilaa uu ka noqday mid ka horreeya dadka la mid ka ah, laguna tiriyay culumada la yaqaan, wuxuuna ku soo noqday Magaallada Muqdisho wuxuuna bartay dadkii deganaa ayaguna way barteen asaga oo la kulmay macaan iyo kharaar wixii ay la hayd maalmihii isticmaarka, wuxuuna dukaan yar furay

magallada Muqdisho, kamana uusan tagin akhrintii kutubta diiniga ah iyo wargaysyada.

Wuxuu ahaa xubintii afraad ee xubihii 13ka ahaa ee ururkii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed,asaga nin xaqa ku socda ah ku sabra xaaladaha, ahna nin fantiisa ku qaba kalsooni adag kuna dhagan waxyaabaha uu rumaysan yahay, isaga oo la wareegay madaxnimadii ururka sannadkii 1949kii, wuxuuna kala kulmay isticmaarka dhibab iyo xaalado adag oo noocyo badan, taaasina ma aysan qalbi jebin ee wuxuu sii watay arrimihiisii siyaasadda, inkastoo sannaddii 1946kiiuu isticmaarkii ingriiska Xaajiga ka soo eryay magaalladii Qabri Dahare, iyada oo aysan jirin wax dambi ah oo uu galay, laakiin ay sababtu ahayd oo keliya in ay dadku jecelaayeen, isla markaana gilgilay rajooyinkii isticmaarka dadkana u sawiray dhibaatooyinka gumaysiga.

Sannadii 1952kii Talyaanigii ayaa isna wuxuu ka saaray magaallada Baydhaba markii lagu eedeeyay in uu ka dambeeyay dhacdo ka dhacday Kismaayo. Sannaddii 1953kiina wuxuu aaday dalk Masar si uu usoo barto cilmiga siyaasadda, wuxuu galay jamacadda Al-Azhar, kaddib

wuxuu u wareegay kuliyadda sharciga isaga oo ku jiray sadex sano, wuxuuna si wanaagsan u bartay luqadda carabiga qaybaheeda kale duwan, wuxuuna ahaa qofka ugu horreeya raggii siyaasadda xagga hadalka, aftahannimada iyo deeqsiinta hadalka.

Sannadii 1957kii waxaa loo doortay Guddoomiyaha Ururkii Midowga dhallinyarada Soomaaliyeed, mar labaad ayaa xilkaaas loo doortay, isaga oo ku sugnaa dalka Masar, taasna wax kale maysan ahayn ee waxay ahayd jacayl dadku jecel yihiin oo dhab ah.

Wuxuu ku soo laabtay waddankakaddib markii uu u yeeray maamulka dhexe si uu uqabto hoggaanka xisbiga isagoon weli qadan shahaadadiisii Jaamacadeed, wuxuu ahaa nin markasta ku dadaala sidii uu isugu soo dhawayn lahaa quluubta dadka una burburin lahaa mabaad'ida gumaysiga iyo fikradihiisa siyaasadeed isaga oo dhihi jiray ma doonayno xornimo dhaawacan.

Muddo kaddib waxaa soo ifbaxay khilaaf siyaasadeed oo u dhexeeyay isaga iyo qaar ka mida maamulkii dhexe ee

xisbiga, taasoo keentay in laga casilo hoggaankii xisbiga, lagana saaro xisbiga arrintaas oo gumaysiga Talyaanigu gacan xoog leh ku lahaa.

Arrintaas darteed wuxuu aasaasay xisbi cusub, oo lagu magacaabi jiray Xisbiga Midnimada Soomaali Wayn, wuxuuna noqday hoggaanka xisbiga, isaga oo muujiyay firfircooni wayn iyo horumar, ciyaaraynа door aad uwayn dhanka siyaasadda, wuxuuna wakhtigiisa geliyay kun bixiyay arrintaas.

Wuxuu amaan dheeraad ah ku lahaa dhaqdhaqaaqii Soomaaliyeed wuxuuna ahaa mid ku dadaala midaynta qaybaha Soomaaliya ( Shanta Soomaaliya), wuxuuna ku caan baxay waddan jecayl iyo in uu u qiiroodo danaha guud, wuxuu ahaa mid wakhtigu u saamaxay in uu hoggaamiye wanaagsan ahaado, raacana wax kasta oo uu u arko in waddanka dani ugu jirto, waxaana yarayd in la helo cid is hortaaga quwad kasta iyo siyaasad kasta oo uu leeyahay.

## Xubinta 5aad.

## Mudane Cisman Geeddi Raage:



Wuxuu ku dhashay Mudane Cismaan Geeddi Raage Magaallada Muqdisho, sannadii 1925kii, wuxuuna ku soo barbaaray guriga waalidkiis nolol iska dhexdhexaad ah sida wiilasha la midka ah ee Soomaaliyeed, yaraantiiisii ayuu bartay Qur'aanka kariim ka ah iyo mabaad'ida diinta Islaamka, markii uu waynaday gaarayna xilligii ku haboonaa wuxuu ku biiray Iskuulka hoos ee Talyaniga wuxuuna ka bartay Luqadda Talyaaniga ilaa uu heer ka gaaray, wuxuuna u leexday arrimihiisa khaaska ah, taas oo uu ku jiray waqti dheer si uu waasiciyo nolasha dadkiisa wuxuuna jeclaa dadka shaqeeya dadaalana, kaddib naftiisu waxay jaclaysatay ganacsiga wuxuuna iibsaday gaari oo uu ku kaladaabuli jiray badeecooyinka isaagoo kala gayn jiray magaalooyin kala duwaan , wuxuu ku jiray xaaladdaas isagoo ku hoos noolaa dhibaatada gumaysiga kaas oo waddanku gacantiisa ku jiray una diiday

muwaadiniinta xaqoodaa iyo in ay ku intifaacaan khayraadka waddankooda.

Cismaaan Geeddii wuxuu noqday xubintii shanaad ee ka midka ahayd xubnihii 13ka ahaa ee aasaasay Golihii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuu hagaajiyay shaqadiisii si go'aan leh iyo niyad wanaag, in la kor yeelo sharafta dadkiisa, wuxuu la wadaaagay walaalihiis ka mira dhalinta ujeeddada koowaad oo ah aasaasidda Golahan wuxuuna ahaa isku soo dhaweeyaha quluubta, kulmiyaha dad farabadan, kiciyaha dareenka si looga hortago xadgudybyada gumaysiga ee xornimada waddanka iyo baa bi'inta khayraadkiisa.

Mudane Cismaan wuxuu ahaa nin ku waafaqsan dareenka ay qabaan saaxiibadiisa kale, kaddib markii ay maqaadiirtu kulmisay asaga iyo saaxiibadiis uuna arkay go'aan kooda kaas oo ah in la gaaro meesha ugu dambaysa, kaddibna deg deg ayuu ugala qayb qaatay si ay faan ugu noqoto ka qayb qaadashada shaqadan wanaagsan ee waddanka loo qabanayo.

Waxaa la sheegay Mudane Cismaan Geeddi iyo saaxiibkiis Mudane Daahir Xaaji Cismaan in xilli habeen ah iyagoo ka soo baxay Maqaaxi una degdegsanaa arrrin iyaga haysatay, ayaa waxay arkeen gaari talyaani leeyahay oo hortaagan Maqaaxida, waxay go'aansadeen inay fuulaan ninkii talyaaniga ahaana ku qasbaan in uu uqaado oo uu geeyo

meesha ay rabaan, daqiiqado kaddib waxaa soo baxay ninkii talyaaniga ahaa ee lahaa gaariga, kaddib markii uu arkay labada nin ee gariga saaran ayuu aad u xanaaqay wuxuuna ku yiri "Iiga dega gaariga looma ogala dadka madow in ay fuulaan maxaa yeelay way wasakhaynayaan". Laakiin dheg jalaq uma aysan siin waxayna ku adkaysteen go'aankoodii ahaa inuu qaado, isna wuxuu ku adkaystay in ay lugeeyaan, waxaase dheeraaday murankii u dhaxeeyay, ilaa uu ku soo baxay nin booliska, arrintiina loo gudbiyay ninkii xukumay magaallada, wuxuuna soo saaray amar faraya Xuudi oo ah ninka leh gaariga in uu u hoggaansamo rabitaanka dadka dhamaantood, isaga oo aan kala soocayn, ama uu ka tago waddanka gaarigana lala wareego. Dhacdaas waxay ahayd cashar waddani ah oo ay sameeyeen labadaas nin.

1956kii waxaa loo magacaabay CismaanGeeddi qoraaga qaybta sanduuqa caymiska bulshada Soomaaliyeed, muddo markii uu howshaas hayay ayaa loo magacaabay madaxa sanduuqaa caymiska ee bulshada Soomaaliyeed.

**Xubinta 6aad:**

**Mudane Dheere Xaaji Dheere.**



Mudane Dheere Xaaji Dheere wuxuu ku dhashay magaallada Muqdisho sannadii 1926kii waxaana barbaariyay labadiisa waalid tarabiyo wanaagsan, Aabihiis ayaa sigaar ah u tarabiyay xaga nafta iyo jirka, kaddib markii uu gaaray waxbarasho ayuu bilaabay barashada Qur'aanka iyo xifdintiisa, waxbarashada ayuu aad u jecla, ku dadaali jiray inuu keligiis wax is baro, taasina waxay muujinaysay dhiiranaantiisa iyo maskaxdiisa oo waasac ah.

Yaraantiisa xagga waxbarashada aad buu ugu firfircoonaa, laakiinmarkii dambe wuxuu u weecday dhanka ganacsiga. Wuxuu kula noolaa caasimada waalidkiis, waxay is barteen in badan oo ka mida dadka magaallada ku nool. wuxuuna la kulmay qaraarkeeda iyo macaan keeda iyo khayrkeeda iyo sharteeda yaraantiisii. Horraantii dagaalkii labaad ee adduunka, ayuu ganacsi u aaday Bariga Afrika, isaga oo

dhowr mar ku laablaabtay dalka Tanzania, mar uu ku sugnaa dalka Tanzania ayaa lagu dhawaaqay dagaalkii Adduunka, taasina waxay keentay in isticmaarkii uu xabsiga dhigo, wuxuuna ku jiray 20 cisho, kaddibna waxaa loo soo tarxiilay waddankiisa, Muqdisho ayuuna inta badan noloshiisa ku qaatay isagoo ganacsigiisa ku mashquulsanaa.

Wuxuu ahaa xubintii lixaad ee kamidka ahaa 13kii xubnood ee aasaasay Ururkii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuuna ka mid ahaa dadka xamaasadda u hayay mabaad'ida xisbiga waddaniga ah, wuxuu ka mid ahaa dadkii ku dhawaaqay in la iska kiciyo gumaysiga soo duulay, wuxuuna ka mid ahaa dhaqdhaqaaqii qoomiyadeed, wuxuu qaatay Calankii waddaniyada si looga xoreeyo shacabka dulliga, jahliga, xanuunk iyo adoonsiga isticmaarka, wuxuu isbahaysi la sameeyay saaxiibadiisa kale sidii cadowga looga soo celiyo muwaadiinta xaqooda.

Maalmihii uu isticmaarku dadka ku samaynayay caburinta iyo qasbidda ayuu ka tagay shaqooyinkiisii oo dhan si uu waddanka uu shaqeeyo, wuxuuna la wadaagay walaalihiis dagaalkii iyo halgankii adkaa taas oo ahayd wixii shacabku doonayeen, waxaa loo doortay marar badan in uu ka mid

noqdo tiirarka ugu waawayn ee maamulka dhexe ee xisbiga. Sidoo kale waxaa marar badan loo doortay maamulka hoose.

Ka hor inta aysan imaanin Soomaaliya kooxdii afarta ahayd ee ka koobnaa waddamadii waawaynaa ee dunida ee kala ahaa Midowgii Soofeeti, Maraykanka, Ingiriiska iyo Faransiiska, kuwaas oo doonayay in ay Soomaalida afti ka qaadaan in ay doonanayaa in uu wakiil noqdo golaha loo dhanyahay ee umadaha midoobay.

Dheere Xaaji dheere wuxuu ku biiray Xisbiga ( Dhallinyarada Xamar) isaga oo ka shaqaynay xaruntiisa dhexe inta uusan u bedalin Midawga Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuuna noqday xoghaynta xisbiga, asagoo si guul ah u shaqeeyay, awoodayna xisbiga Dhallinyarada xamar in uu ku socdo waddadii loogu talagay ee xisbiga Midowga Dhallinyarada Soomaaliyeed.

Dhanka kale sida caadi ah wuxuu ahaa mid ku mashquula ganacsiga, isga oo iibin jiray waxyaabaha uu hayo, soona gadan jiray waxyaabaha uu u baahan yahay. Ganacsigiisa mararka qaar wuxuu ahaa mid ku xiran ganacsiga Aabbihiis, sababtoo ah Aabbihiis wuxuu ahaa nin taajir ah oo hanti badan leh, ahna dadka aad looga yaqaano Magaallada.

**Xubinta 7aad:**

**Mudane Daahir Xaaji Cismaan**



Wuxuu ku dhashay Mudane Daahir Xaaji Cismaan Magaallada Hobyo gobalka Mudug sannadii 1925kii, kaddib qoyskoodu waxay u wareegeen Magaallada Muqdisho isaga oo jira sadex sanno, wuxuu ku barbaaray guriga waalidkiis, isagoo tarbiyo wanaagsan helay, wuxuu Qur'aanka ku bartay yaraantiisiiMagaallada Muqdisho, wuxuun ka qaatay Culumada Magaallada mabaad'ida Islamka iyo Culuunteeda. Wuxuu bartay Fiqiga iyo luqadda Carabiga. Markii uu gaaray tobaneeyo sano ayuu ku biiray iskuulka hoose Talyaaniga isaga oo ka bartay Luqadda Talyaaniga.Kaddib wuxuu u wareegay iskuul caadi ah oo ku bartay Luqadda Ingiriiska, wuxuuna noqday qo si siman uga wada hadla saddexda luqadoodee Talyaaniga, Carabiga iyo Ingiriiska.

Waxana xoogaystay aqoontiisa luqadda ingiriiska xilligii uuisticmaarkii Ingriiskahaystay Soomaaliya.

Wuxuu ahaa xubintii todabaad ee ka midka ahayd xubnihii 13ka ahaa ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuu ahaa xubin daacad ah si wanaagsanna uga shaqeeya arrimaha mamulka dhexe, isaga oo kala agaasimay howlaha ay tahay in laqabto iyo sida ay isugu xigayaan iyo isagoo u sameeyay waqtiyayn si ay u sahlanaato shaqadu, maxaa yeelay wuxuu ahaa, shakhsi firfircoon khibradna wayna u leh nidaaminta howlaha, wuxuu la gooni ahaa in uu u dhabagalo arrimaha hoose ee Xisbiga.

Sannadii 1944kii waxa loo magacaabay Mudane Daahir Xaaji Cismaan in karraani ka noqdo qaybta waxbarashada ee Xukuumaddii Ingiriiska ee gumaysiga.

Waxay ahayd markii ugu horreysay ee uu qabto shaqo dowladeed, wuxuuna noqday tusaale wanaagsan, isaga oo weliba daacad u ahaa Xisbiga, wuxuuna muujiyay inuu

yahay qof shaqadiisa mudnaan u leedahay, ammaana mudan.

Wuxuu ahaa mid yimaada xurunta Xisbiga casarkii marka uu ka soo baxo shaqada dowladda wuxuuna bilaabi jiray shaqada Xisbiga, waxaana loo doorty ninka yaha sirta Xisbiga.

Gumaystihii labo jeer ayuu Mudane Daahir ka tarxiilay Magaallada Muqdisho.Middii ugu horaysay waxay ahayd sanadii 1948kii waxana loo tarxiilay Magaallada Ceelbuur, iyadoo lagu tuhmay in uu ka qayb qaatay arrin ka dhacday Muqdisho, taariikhduna ahayd 7dii bishii 10naad 1948kii, dhacdaas oo lagu magacaabo (Dhagax tuur).

Marka labaadna waxaa loo tarxiilay MagaalladaEyl kaddib markii lagu eedeeyay in uu ka dambeeyay arrinka dhacday magaallada Kismaayo 1952kii. Sanaddii 1952kii wuxuu ku biiray Iskuulka Siyaasadda ee Talyaaniga ee Muqdisho, isaga oo ka bartay cilmiga siyaasadda, kaddibna wuxuu Talyaaniga ka helay deeq waxbarasho oo halsano ah oo ku dhamaystirtay waxbarshadiisii.Sanadii 1954kii waaxaa loo

magacabay wakiil in uu u noqdo ninkii xukumayay Gaalkacayo, wuxuuna ahaa qofkii u horeeyay ee loo magacaabo jagadaas oo kale oo muwaadin Soomaaliyeed ah.

Markii uu dhamaystay tababaradii, khibradna uu helay ayuu noqday Gugdoomiyaha Gobalka Mudug, taas oo uu ku mutaystay firfircoonidiis iyo sidii fiicnayd ee uu shaqada u qabtay iyo kalsoonidiisa, waxay keentay in marba maaalo loowareejiyo isaga oo maamulaya howlaha xukuumadda ee Magaalladaas, wuxuuna howshiisa uga soo dhalaali jiray si wanaagsan.

Sannadkii 1960kii waxaa loo doortay in uu noqdo madaxa howlaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha, wuxuuna ahaa khabiir xilkaasi ku wanaagsan, isla sannadkaas wuxuu aaday dalka Japan isaga oo madax u ahaa wafdi matalayay dowladda Soomaaliya, intii uu ku sii jiray howlaha wasaaradda wuxuu kaloo safar u aaday dalka Jarmalka, isagoo mar kale cilmiga siyaasadda ka soo bartay. Sannadii 1964kii waxaa laga dhigay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## Xubinta 8aad:

## Mudane Cali Xuseen (Maslax)



Fursad umaaanan helin in aan la kulano Mudane Cali Xuseen (Muslax) si aan uga wa[redacted]reysanno waxyaaba ku saabsan taariikhda nolashiisa, maxa yeelay wuxuu xilligaas ku maqnaa waddanka Maraykankaoo uu shaqaale ka ahaa safaarada Soomaaliya ee Maraykanka ku taal.

Waxaan isku dayay in badan in aan helo taariikh nolaleedka wiilkan Dhallinyarada ah ee wanaagsan waxaana la xariiray walaalkiis waxna iguma kordhin. Sidaa darteed waxaan ku soo gaabsanaynaa xogo yar yar oo aan ka soo aruuriyay saaxiibadiis, laakin dib ayaan kaga soo dari doonaa buugga wixii aan ka tagnay ee taariikhda ninkaan haddii ILAAHAY idmo daabacaadda soo socota, haddii ay inoo fududaato in aan la kulano ninka taariikhda leh.

Wuxuu ku dhashay Mudane Cali Xuseen Magaallada Hobyo, wuxuuna ku barbaray baadiyaha halkaas oo ay ciddoodu xoola dhaqato oo ah ku noolaayeen, wuxuuna ku noolaa

deegaan caadi iska ah sida ay dadka oo dhan ahaayeen xilligiisii, xilligii uu yaraa wuxuu u wareegay dhanka Eyl halkaas oo uu Qur'aanka kariim ka ah ka bartay macallin ka mid ahaa macallimiintii halkaas joogtay, xoogaa kaddib wuxuu usoo wareegay Magaallada Muqdisho halkaas oo dad qarabadiisa ah ay deganaayeen, kaddib wuxuu bartay Luqadda Talyaaniga, isaga oo ay xiliyo soo mareen uu ka fakarayo mustaqbalkiisa.

Wuxuu ahaa xubintii sideedaad ee ka mid ahayd xubnihii 13ka ahaa ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuu ahaa nin dhallinyaro ah oo waddani ah xamaasad ay ku jirto waddankiisana jecel, isaga oo ka warhaya xaladda Dhallinyarada xorta ah sida ay yihiin, sanadihii u dambeeyay wuxuu ku biiray iskuulaadkii dowladda ee la dhisay xilligii maamul hoosaadka, wuxuuna ka baxay Machadkii Macalimiinta Muqdisho, kaddib wuxuu aaday Talyaaniga oo uu tababar ku soo qaatay, isaga oo ahaa shaqaale dowladeed xilligii xukun hoosaadka, waxaa loo magacaabay xornimadii kaddib lataliyaha Safaaradda Soomaaliya ee Maraykanka ee Washignton.

## Xubinta 9aad.

### Mudane Maxmed Cali Nuur



Wuxuu ku dhashay Mudane Maxamed Cali Nuur Magaallada Muqdisho Degmada Shangaani 1927kii, wuxuuna ku dhex barbaaray labadiisa waalid dhabtooda, si wanaagsan way u koriyeen, wuxuu yaraantiisii bartay Qur'aanka Kariimka ah, Qorista iyo mabaad'ida Culuumta islaamka. Markii uu gaaray sanadka wax lagu kala sooco wuxuu galay madarasada Talyaaniga ee hoose, isagoo ku jiray ilaa sadex sanno, wuxuuna kabaratay LuqaddaTalyaaniga, aad buuna ugu u bartay Luqadda ilaa xuukuumaddii Talyaanigu uqaadatay in uu ka noqdo karraani mid ka mid ah xafiisyadeeda, wuuna ka shaqaynayay ilaa ay ka dhacday boqortooyadii Talyaaniga.

Sannadii 1943kii xukuumaddii Ingiriiska baa u qaadatay shaqaale isla xafiiskii uu ka shaqayn jiray, xilligii xukuumadii Talyaaniga, wuxuuna ahaa mid isku bedbedalay jagooyin badan xukuumaddii Ingiriiska ilaa qadartu la kulmisay saaxiibadiis waddaniyiinta ahaa.

Wuxuu ahaa xubintii sagaalaad ee ka mid ahayd xubnihii 13ka ahaa, ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada

Soomaaliyeed, kaas oo taagay tiirarkii xornimada iyada oo ay jirtay dhammaan wax kasta oo wax lagu caburiyo sida: hanjadaabo, Xirid, burburin iyo fogayn ama tarxiilid,·laakin Xaaji Maxamed Cali waxaa loo wareejiyay Gaalkacayo iyada oo lagu tuhmay in uu ku lug leeyahay dhaqdhaqaaq siyaasadeed, bedellaadiisiina waxay ahayd guul wayn iyo firfircooni xisbiga usoo korartay uu halkaas ku yeesho saamayn, haddana way ka badashay xukuumadii isticmarka ahayd waxayna u wareejisay qaybta Majeerteeniya isaga oo halkaas ka muujiyay dhaqdhaqaaqiisii xornimaddoon ah, isagaoo wata shaqadiisii xukuumadda ayuu haddana marnaba ka caajisi jiriin dhaqdhaqaaqyadiisii xornimo-ddoonka ahaa , kaddibna waxaa loo wareejiyay Gobalka Mudug, intii lagu dhexjiray war wareejintiisa waxaa batay dhaqdhaqaaqii waddaniyadda.

Sannadii 1947kii waxaa si rasmi ah loogu bedelay Baladwayne, wuxuuna ka dhigay muhiimadiisa koowaad in uu u shaqayeeyo xisbiga midnimda Dhallinyarada Soomaaliyeed, isaga oo ilaalinaya shaqada uu hayo, waxaana kordhay dhaqdhaqaaqiisii waddaniyadda,

kaddibna waxaa loo fogayay Boosaaso, kaddib markii lagu tuhumay in uu ka qayb galay dhaqdhaqaaq siyaasadeed, waxaa la sheegay intii uu ku sugnaa Boosaaso in uu ka qaatay kaalin wayn kacdoonkii ay dadkii daganaa Boosaaso ay ku kaceen ninkii Ingiriiska ee xukumay iyaga oo ka carooday sida xun ee uu ula dhaqmo, kaddib xisbiga ayaa soo gudbiyay cabasho, una gudbiyay madaxda sare, mana uusan jirin cid taqaanay Luqadda Ingiriiska asaga mooyee, ninka ingiriiska meesha u xukamana wuu ogaa arrintaas, Mudane Maxamed Cali Nuur ayaa ku qoray gacantiisa warqaddii dacwadaahayd, markii uu dacwadii arkay ayuu waydiiyay, yaa qoray warqadan? Aniga ayaa qoray ayuu ku jawaabay, kaddibna wuu qayliyay ninkii ingiriiska ahaa wuxuuna amray in uu Magaallada ka tago inta aysan qoraxdu dhicin.Waxaa uu ku soo noqday Caasimada isaga oo isku dayay marar badan in uu Xisbiga Xamar iyo Xisbigiisa uu mideeyo ilaa uu ku guulaystay arrintaas.

Sannadii 1957kii wuxuu aaday dalka Talyaaniga isaga oo soo dhamaystiranayay waxbarashadiisii xaga cilmiga ah, wuxuuna ahaa mid hadba jago ka qabanayaydowladda ilaa uu gaaray madaxa arimaha Diyaaradaha.

## Xubinta 10aad

## Mudane Maxamed Faarax Hilowle



Wuxuu ku dhashaay Mudane Maxamed Faarax Hilowle Magaallada Mareeg dhinaca Ceel dheer ee gobalka Galgaduud sannadii 1925kii, Aabbihiisna wuxuu dhintay isaga oo jira sadex sanno, markii uu gaaray toban sanno waxay hooyadi la timid Magaallada Muqdisho, wuxuu bartay Qur'anka kariimka ah iyo mabaad'ida Diinta Islaamka, wuxuuna ahaa wiil firfircoon oo usoo jeeda danihiisa iyo waxyaabaha looga baahan yahay taas oo ay duruufaha dhaqaale ay diideen in ay muuqato fir fircoonidiisa. Wuxuu galay iskuul ka Talyaaniga ee hoose, asaga oo ka bartay Luqadda Talyaaniga iyo qoraalka wixii laga helikaray waddanka xiligaas.

Sannadii 1937kii xukuumadii Talyaanig ee waddanka haysatay waxay u magacowday, in uu Karraani ka

noqdomid ka xafiisyada qaybta Caymiska Bulshada, wuxuuna jagadaas hayay ilaa uu ka bilowday dagaalkii labaad ee dunida, kaas oo sabab u ahaa in ay kacaan dadyowgii la gumaysan jiray, ayna jabeen dowladihii faashistaha ahaa, kaddib markii ay qabsatay xukuumadii Ingiriisku Soomaaliya, wuxuu galay iskuulkii ay xukuumaddii Ingiriisku u furtay shaqaalaheeda, wuxuuna ka bartay Luqadda Ingiriiska, markiiba wuxuuna noqday shaqaale rasmi ah.

Wuxuu ahaa xubintii tobnaad ee ka mid ahayd xubnihii 13ka ahaa, ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuu ahaa nin dulqaad iyo dabeecad wanaagsan leh, ka fog xumaanta, khayrkana jecel, go'aan adag, jecel waddankiisa, ka shaqeeya danihiisa, jecel xaqiijinta himilada xisbigiisa iyo ka toosinta dadkiisa hurdada iyo fadhiga uu sababay dhibaatada gumaystuhu.

Sharciyada gumaystaha waxaa ka mid ahayd in Hoteellada iyo meelaha lagu qaxweeyo aysan soo geli karin dad aan cadaaanahayn, Mudane Maxamed Faarax, wuxuu

go'ansaday inuu ku dhaqaaqo tillaabo kasta oo uu arrintaas ku baabi'inayo. Waxaa la wariyay maalin maalmaha ka mid ah inuu la kulmyay dhallinyaro badan wuxuuna ujeediyay khudbad uu ku kicinayay dareenkooda waddaniyadeed, wuxuuna ku dhiirageliyay in ay galaan Hoteellada iyo maqaayadaha ayna burburiyaan dhammaan qalabka dhex yaal gudahooda, waxayna ahayd xilligii caburrinta lagu hayay dadka Soomaaliyeed, booliskii ayaa xakamayn waayay buuqii ka dhashay falkaas, kaddibna xukuumadii isticmaarka ee Ingiriisku waxay soo saartay amar lagu joojinayo kala sooca iyo cunsuriyadda.

Sannadii 1952kii waxaa la geeyay Boosaaso kaddib markii lagu tuhmay in uu ka qayb qaatay dhaq dhaqaaq siyaasadeed, kaddib markii ay soo saartay xukuumadii Talyaanigu amar ay ku mamnuucayso in dadka muwaadiniinta ay sameeyaan dhaqdhaqaaq siyaasadeed.

Sannadii 1955kii waxaa loo badalay Baydhabo iyada oo aydowladda hoose ay diiday in uu kuhakado Magaallada Muqdisho markii uu safarka ku marayay.Kaddib waxaa loo soo badalay Caasimada halkaas oo baaqi ku ahaaday shaqadiisii xisaabaadka ee xukuumada.

# Xubinta 11-aad

## Mudane Xaaji Maxamed Cabdullaahi (Xayeesi)



Wuxuu ku dhashay Mudane Xaaji Maxamed Cabdullahi Magaallada Muqdisho sannadii 1918kii, wuxuuna ku barbaaray nolol dhex dhexaad ah, sida ay lawadaageen dhallinayaro badan oo Soomaaliyeed, markii uu jiray dhowr sanno ayuu bilaabaya barashada Qur'aanka kariimka ah iyo kutubta yar, wuxuu kale oo uu bartay mabaad'ida diinta Islaamka intii waddanka laga helayay, markii uu waynaaday wuuxu doortay in uu barto Luqadda Talyaaniga, wuxuuna ahaa nin aad u akhlaaq wanaagsan arimihiisana dhexdhaxaysta.

Sannadii 1935kii waxay xukuumadda Talyaanigu udooratay inuu shaqaale caadii ah ka noqdo xafiisyada dowladda, raalina kumuusan ahayn in qabto shaqo aan dalka dani ugu jirin, laakiin waxaa ku qasabtay xaaladdii dhaqaale ee jirtay in uu u shaqeeyo dowladdii gumaysiga, markii uu

gumaystihii Ingiriisku dalka qabsadayna, wuxuu isna u magacaabay shaqadii uu u hayay dowladdii Talyaaniga, shaqadaasna kama uusan tegin ilaa laga gaaray xilligii xukun hoosaadkii Soomaalida.

Wuxuu ahaa xubintii Kow iyo Tobnaad ee ka mid ahayd xubnihii 13ka ahaa, ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed. Waana sax in la yiraahdo wuxuu ahaa nin nadiif ah, qalbigiisuna saafi yahay, hami aad u sareeya leh, wuxuna ku sifoobay wanaag oo dhan, wuxuu jeclaa in waddankiisu koreeyo, shacabkiisana ay la mid noqdaan dadyowga caalamka, wuxuu daacad u ahaa shaqada, isaga oo caan ku ahaa in taageeridda Xisbiga Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuna u istaagay in uu dadka uu ugu yeero waddaniyad sax ah, taas oo ku gaaray balamo waawayn oo ay isku bahaysteen xubnihii waddaniyiinta ahaa ee xisbiga, wuxuu ahaa mid la wadaaga saaxiibadiis sidii looga gudbi lahaa caqabad kasta oo ka dhanka gumaystaha.

Sannadii 1949kii waxay uwareejisay xukuumadii gumaysiga Magaallada Boosaaso shaqada canshuuraha, waxaana lagu tuhmay in uu yahay qofka keliya ee gadaal ka wada dhaqdhaqaaqa siyaasadda xisibiga, waraaqaha xisbiga dirayo ayuu qorijiray wuxuuna qorshayn jiray wadooyinka la maraayo, waxaa la isku dayay in la khaarijiyo wayna suurtageli wayday kaddib markii la waayay ciddii fulin lahayd arrintaas, waxaana loo soo wareejiyay Muqdisho.

Sannadii 1956kii wuxuu aaday dalka Sacuudi Carabiya, si uu usoo guto waajibaadka Xajka, kaddibna wuxuu kusoo laabtay shaqadiisii Karraaninimo, isaga midba mid uga dalacayay ilaa uu ka mid noqday shaqaalaha ugu waawaayn ee rasmiga ah ee xukuumadda.isaga oo sanadihii dambe joogay dhanka canshuuraha ee dakada Muqdisho.

## Xubinta 12aad

## Mudane Huudow Macallin Cabdullahi Saalax



Wuxuu ku dhashay Mudane Huudow Macallin Cabdullahi Saalax tuullada Mareeray ee udhow Afgoye Sannadii 1926kii, wuxuu ku barbaaray guriga waalidkiisa si wanaagsan, w uxuuna xifdiayay Qur'aanka asaga oo aad u yar, waxaana baray Aabbihiis, maxaa yeelay Aabihiis baa ahaa Macallin caruurta bara Qur'aanka, caalimna wuu ahaa dadka u akhriya kutubta cilmiga, waxaana lagu tirin jiray dadka magaca wayn ku leh tuuladaas.

Huudow wuxuu cilmiga diinta islaamka iyo mabaad'ideeda ka qaatay Culumada Magaallada Muqdisho xilligiisii, wuxuuna ahaa dadka uu jeclaa Mudane Cabdulqadir Sakhaawaddiin, asaga oo ka mid ahaa dariiqada Suufiyada.

Sannadii 1939kii waxaa loo magacaabay kalkaaliya caafimaad mid kamid ah isbitaallada Muqdisho, wuxuuna hayay shaqadan ilaa ay ka burburtay dowladdii Talyaaniga, booskeediina ay degtay dowladdii Ingiriiska, xilligaa kaddib waxaa uu ka tagay shaqadii wuxuuna qabsaday

shaqooyinkiisa gaar ka ah isagoo ku sugan Magaallada Muqdisho, waxay isbarteen rag aqoonyahano ah oo xilligaas joogay wuxuuna lalahaa xiriir wanaagsan gaar ahaan dariiqada suufiyada.

Wuxuu ahaa xubintii Laboiyo Tobnaad ee ka mid ahayd xubnihii 13ka ahaa ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuu aad ugu dadaalijiray isu soo dhawaynta Dhallinyarada gaar ahaan meelaha uugaranayo dadka dagan, waxaana hadalkiisa ku dheeh naan jiray dareen diineed iyo mid waddaniyadeed kaas oo kicinaya dadka uu la hadlayo xamaasadna ku beerayo, wuxuu lahaa shakhsiyad aad u xoogan iyo hami aad u sareeya, wuxuuna ka gaaray shaqadii xisbiga iyo firfircoonidiisii darajo aad u wayn.

Waxaa ku dhacay xanuun ay dhakhaatiirtu daawayn wayeen, kaddib markii lagu sameeyay baritaan xanuunkaas, maalin maalmaha ka mid ah isagoo weli isbitaalkii ku jira, ayuu badda soo aaday iyadoo cid og aysan jirin, dharkiisii ayuu dhigay xeebta kaddibna Biyaha ayuu galay nasiib daro waxaa ka xoog batay hirarkii badda, waxayna u kaxeeyeen waana la waayay maydiisii ilaa maalintii labaad, wuxuu la kulmay Rabigiis asaga oo Shahiid ah Sannadii 1945kii Allaha u naxariisto.

**Xubinta 13aad.**

**Mudane Maxamed Cusmaan Baarbe.**



Wuxuu ku dhashay Mudane Maxamed Cusman Baarbe Baardheere Sannadii 1910kii wuxuuna ku barbaaray guriga waalidkiis, yaraantii ayuu bartay Qur'aanka iyo mabaad'ida islaamka sida ay caadadu ahayd wadamada muslimiinta ah, kaddib wuxuu galay iskuul ka hoose Talyaaniga ee Baardheere.

Sannadii 1924kii xukuumadii Talyaanigu waxay u magacawday Karraani Luqadda Carabiga ah, labo sanno kaddibna waxay uwareejisay majeerteeniya kaddibna wuxuu usoo noqday Magaallada Muqdisho wuxuuna sii watay shaqadiisii ilaa sannadii 1933kii.

Isaga iyo nin lagu magacaao Axmed Maxamed Ciise ayaa waxay aasaaseen shirkad, balse nasiibdarro ma aysan

guulaysan shirkaddoodii kaddib markii ay wayday waxyabihii ay ubaahnayd iyo cadaadiska gumeysiga Talyaaniga uga yimid, kaddib Mudane Maxamed Cusmaan wuxuu shaqo ka helay dowladdii Talyaaniga taas oo uu muddo la joogay, ilaa maqaadiirtu lakulmisay saaxiibadiis labo iyo tobanka ah wuxuuna yaqaanay Luqadda Ingiriiska.

Wuxuu ahaa xubintii Saddex iyo Tobanaad ee ka mid ahayd xubnihii 13ka ahaa ee aasaasay Xisbigii Midnimada Dhallinyarada Soomaaliyeed, wuxuuna ahaa ninka ugu da'da wayn, wuxuu muujiyay markiiba firfircoonidiisa isaga oo gaaray dhanka waddaninimada xad aan la qiyaasi karin, wuxuu dadaal aad u weyn ku bixiyay sidii loo gaari lahaa xornimo dalkana gumaystaha looga saari lahaa, wuxuuna ku sifaysnaa sifooyinka dadka xorta ah, wuxuuna ku dhexlahaa xisbiga xushmad iyo ixtiraam wanaagiisa dartiis, wuxuuna la wadaagay walaalihiis jihaadkii iyo halgankii ay wadeen.

Sannadii 1955kii waxaa loo magacabay Karraani xafiis kamid ah xafiisyadii dowladdii Talyaaniga ee sii haysay waddanka, kaddib waxaa loo wareejiyay Diinsoor kaddib

markii lagu tuhmay in uu ku lug leeyahay dhaqdhaqaaqii xornimo doonka ee Muqdisho ka socday, muddo gaaban ayuu joogay Diinsoor, kaddibna waxaa loo bedelay Baydhabo.

Sannadii 1933kii waxaa laga joojiyay shaqadii tuhun aan la xaqiijin, maalma kaddibna wuxuu iska casilay jagadii, wuxuuna la shaqayn jiray shirkado Talyaani ee ganacsi wuuna la shaqaynayay ilaa uu dhacay dagaalkii 2aad ee dunida, kaas oo Talyaanigu ku jabiyeen isbahaysigii ka soo horjeeday.

Xiligaas ayuu ka tagay shaqadii asaga oo aaday Baardheere wuxuuna noqday ganacsade, dowladdii Soomaaliyeed ayaa u magacowday guddoomiye ku xigeenka degmada Doolow.

**Dhammaad.**

Tani waa taariikhdii madaxdii SYL kuwaas oo lahaa saamayntii ugu waynayd xorrayntii Soomaaliya. Waxaana usoo gudbinaynaa Dhallinyarada si ay uga dhigtaan tusaale iyo ku dayasho, waa in aysan yaraysan naftooda, kana quusan in ay gaaran ujeeddadooda, kuma uusan jirin Dhallinyaradaas sadex iyo tobanka ah Skeekh wayn ama hoggaamiye caan ah, ama nin maalqabeen ah, laakiin waxay ahaayeen dhallinyaro lamid ah Dhallinyarada caadiga ah, waxayna u barbaareen sida Dhallinyaradawaddankauu noolaayeen, waxaa ku jiray wiil aan weli gaarrin 20 sano, ka ugu wayna ma dhaafin 33 sano, laakiin iimaanka, go'aanka iyo waddan jacaylka bay ku gaareen wixii ay gaareen oo khayr iyo liibaan ahaa.

Kulankoodii wuxuu ahaa galab ay bisha May ahayd 15, 1943kii waxay ahayd bilowgii sharafta, ma aysan ahayn dadkii loo yeeray xubnaha keliya, balse waxaa loo yeeray 200 oo qof, markii la gaaray waqtigii la ballansanaa ma aysan imaanin cid kale iyaga mooyee, waxaana la xiray albaabkii, waxaana dhacay shirkii taariikhiga ahaa, waxaabad moodaa albaabka la xiray inuu ahaa albaab

taariikh ah, way galeen waxayna galeen taariikh, waana laga xiray ciddii ka dib dhacday.

Isu ekaysiiya haddii aydan ahayn iyaga oo kale, su ekaysiinta ragga wanaagsan waa guul.

Khayr Allaha idin ku abaalmariyo waddankeena sharafta lehna guul iyo horumar Allaha gaarsiiyo.

Aw Jaamac Cumar Ciise Soomaali

Wuxuu ii sheegay Macalin (Maxamed Wajiih Sulaymaan) oo ka mid ahaa Macalimiin loo soo diray Soomaaliya oo Carab ah, Mudane Maxamed Cusman oo ka mid ahaa xubnihii 13 da ahaa wuxuu igu yiri, goluhu wuxu u dhisnaa sidan:

Shiikh Cabdiqadir Sakhawadiin Gudoomiye, Mudane Xaaji Maxamed Xuseen iyo Mudane Xisri Nuur gudoomiye ku xigeeno, Mudane Yaasiin Xaaji Cusmaan Xoghaye, Mudane Daahir Xaaji Cusmaan Xoghaya Maaliyada,Shiikh Maxamed Cusmaan Maxamed (Baariya) iyo Mudane Dheere Xaaji Dheere kor meerayaasha Maaliyada.

## HORDHACA TURJUMAHA BUUGA

Waxaa mahad oo dhan iska leh Allaha awooda leh, ina waa fajiyay in aan turjumo buugan uu qoray Allaha u naxaariistee Aw Jaamac Cumar Ciise, oo ka qoray dhallinyaro Soomaaliyeed oo baal dahab ah ka galay taariikhda Soomaalida waana Dhalinyaradii loo yaqanay (SYL).

Buugan waxaan ka soo turjumay luuqada Carabiga waxaana u badalnay luuqada Soomaaliga, si ay u fahmaan muhiimada ay la'haayeen dhallin yaraddii halkagan ka adag soo gashay hormuud kana ka ahaa xornimadii ay Soomaaliya gaartay

## Muhiimada Taariikhda

waa tagto looga faa iidaysto timaado.

Taariikhda labo qaybood baa looga faa iidaystaa, dhan waa ku dayasho dhanna waa ka digtoonaan, hadii aan ku hormarno mida ku dayashada mudan waa mida lagu gaaray guusha, waxaana ooga dayanaynaa wanaagaas iyo guushaas ay gaareen qaabkii ay ku gaareen in aan marno oo aan ku dayano ama aan raad raac ku samayno. Dhanka ka digtoonanta taariikhda waa tagto aan loo baahnayn in ay soo noqoto oo marlabaad kugu dhacdo, waa taariikh xanuun badan oo ubaahan in aad ka digtoonaatid. Wax tusaale laga qaato waxaa u qaalisan waa kitaabka Alle, Allah marka uu ka waramayo umadihii hore sida fircoon, qoomu luudh, reer Caad iyo dhamaan umadihii la halaagay. Suubanuhu wuxuu yiri xanariis iyo nabad galyo kor kiisa ha ahaatee ( mu'min labo jeer god lagama qaniino), taas oo macnaheedu yahay in aadan ku laaban wadadii aad ku khasaartay.

## SABABAHA LOO TURJUMAY BUUGAN

Allaha u naxatiistee Ow Jaamac Cumar Ciise oo buugan qoray ayaa ku sheegay sababtii ku kaliftay in uu qoro kadib markii wiil Soomaaliyeed uu waydiiyay maxaa loo la'yahay taariikhdii ragii soo halgamay ee dhallin yarada ahaa? Wuxuu ka jawaabay su'aashaas kadibna wuxuu

qoray kitaaabkan yar oo qornaa afka carabiga kaas oo ka hadlaya taariikhda dhallinyaradii Soomaaliyeed ee soo halgamay xiligii gumaysiga.

Hadaba xaalad noocee ah bay ku shaqeeyeen ragan? Waxay hoos joogeen gumayste aan u naxay, oo madaxa cagta ka saaraya, aan ogalayn dhaq dhaqaaq xornimo ama mid siyaasadeed, mala hayn dhaqaale ay ku howl galaan, sida aad ka arki doontid akhriste waxay ahaayeen dhallin yaro, yar yar oo ay san ku jirin dad waa wayn, mana aysan haysan wax yaabo badan oo maanta ay haystaan dhallinyarada Soomaaliyeed, oo ka mid tahay aaladaha cusub ee lagu wada xariiro noocyada kale duwan, aqoonta, dhaqaalaha iyo aqoonta, taas oo la dhihi karo in ay fursadaas maanta haystaan dhallinyarada Soomaaliyeed, hadaba waxaa isways diin akhriste soo may mudno in lagu daydo dhallinyaradii soo halkgan tahay iyaga oo aan haysan fursada badan oo maanta ay haystaan dhallinyarada Soomaaliyeed waxaad ka heli kartaa tusaale wanaagsan iyo sida ay oga bad baadeen caqabada badan oo gumaystuhu u dhigay runtii maanta Soomaalidu waxay u baahantahay dhallinyaro bad baadisa dibna usoo celisa sharaftii umada Soomaaliyeed.

**GABA GABADDII**

Waxaa mahad iska leh Allah SWC, waxaan rabaa in aan halkan uga mahadceliyo ugu horayn Cabdullahi Maxamed Sheegow oo asagu bud dhig u ahaa turjumida buugan lahaana fikradiisa dhiira galiyay in aan turjumo buugan, si ay uga faa'iidaystaan dhallinta Soomaaliyeed una bartaan halgamayaashii Soomaaliyeed ee u soo halgantay xuriyada, waxaan sidoo kale u mahad celinayaa Cabdullahi ..... oo galiyay wakhti badan saxidiisa.

W/Q. Cabdullahi Shiikh Aaden Shire